# DASTUURKA MIDOWGA ARDAYDA CULUUMTA KOMBUYUUTARKA EE JAAMACADA SIMAD {FOCSA}

# NUQURKA DASRTUURKA:


**CUTUBKA 1AAD: MABAADI'DA GUUD** .... 4

QEYBTA 1AAD: ASTAAMAHA AASAASIGA AH EE MIDOWGA .... 4

Qodobka 1aad: Magaca iyo Ujeedka .... 4

Qodobka 2aad: Sarraynta Sharciga .... 4

QEYBTA 2AAD: XUQUUQAHA IYO SINNAANTA .... 4

Qodobka 1aad: Sinnaanta Ardayda .... 4

Qodobka 2aad: Xaqa Midowga .... 4

Qodobka 3aad: Xaqa Ardayga .... 5

**CUTUBKA 2AAD: QAAB-DHISMEEDKA IYO HOWLAHA MIDOWGA** .... 6

QEYBTA 1AAD: GUDOONKA MIDOWGA .... 6

Qodobka 1aad: Hanaanka Gudoonka Midowga .... 6

Qodobka 2aad: Howlaha Gudoonka Midowga .... 6

QEYBTA 2AAD: FULINTA MIDOWGA .... 6

Qodobka 1aad: Hanaanka iyo Howlaha Fulinta midowga .... 6

Qodobka 2aad: Xil-wareejinta Midowga .... 7

QEYBTA 3AAD: KULAMADA MIDOWGA IYO GO'AAN QAADASHADA .... 7

Qodobka 1aad: Kulamada Midowga .... 7

Qodobka 2aad: Go'aan Qaadashada .... 7

QEYBTA 4AAD: ISLA XISAABTANKA IYO GANAAXA MIDOWGA .... 8

Qodobka 1aad: Isla Xisaabtanka Midowga .... 8

Qodobka 2aad: Ganaaxa Xubnaha Midowga .... 8

Qodobka 3aad: Luminta Xubinimada Midowga .... 8

QEYBTA 5AAD: MAAREYNTA MAALIYADDA MIDOWGA .... 8

Qodobka 1aad: Maareynta Maaliyadda .... 8

**CUTUBKA 3AAD : DOORASHOOYINKA** .... 9

QEYBTA 1AAD: HANAANKA IYO GUDDIGA DOORASHOOYIINKA .... 9

Qodobka 1aad: Guddiga Doorashooyinka .... 9

Qodobka 2aad: Doorashada Gudoonka Midowga .... 9

QEYBTA 2AAD: SHURUUDAHA GUDOONKA MIDOWGA IYO CODBIXIYAHA .... 9

Qodobka 1aad: Shuruudaha Musharaxa .... 9

Qodobka 2aad: Shuruudaha Codbixiyaha .... 10

**CUTUBKA 4AAD : DASTUURKA** .... 11

QEYBTA 1AAD: FURITAANKA IYO WAX KA BADALKA DASTUUKA .... 11

Qodobka 1aad: Furitaanka Dastuurka ... 11
Qodobka 2aad: Wax Ka Badalka Dastuurka ... 11
QEYBTA 2AAD: ANSIXINTA DASTUUKA ... 11
Qodobka 1aad: Ansixinta Dastuurka ... 11

# CUTUBKA 1AAD: MABAADI'DA GUUD

## QEYBTA 1AAD: ASTAAMAHA AASAASIGA AH EE MIDOWGA

### Qodobka 1aad: Magaca iyo Ujeedka

1. Magaca rasmiga ah ee midowga waa Faculty of Computing Students' Association (FOCSA), macnihiisu yahay Midowga Ardayda Kulliyada Culuumta Kombuyuutar-ka Ee Jaamacada SIMAD.
2. Ujeedka Midowga waa matalida iyo mideynta ardayda kulliyada, hubinta iyo sara uqaadida danaha ardayda kulliyada iyo danaha guud ee kulliyada, ka dhex muuqashada howlaha guud ee jaamacada, iyo sidoo kale abuurida howlo waxtar u leh ardayda kulliyada iyada oon lagatilaabeyn xeerarka jaamacada iyo xuduudaha Eebbe.

### Qodobka 2aad: Sarraynta Sharciga

1. Sharciga ayaa ka sarreeya qof kasta oo ka tirsan midowga, mana jiri karo qof, koox ama qayb kamid ah ardeyda oo awoodda midowga u adeegsan kara si gaar ah.
2. Dhammaan hay'adaha midowga iyo ardayduba waxay u hogaansamayaan dastuurka midowga, shuruucda kulliyada, iyo shuruucda guud ee jaamacada.
3. Awoodda oo dhan waxaa iska leh ardayda, waxayna u dooranayaan masuuliyiin ay u xilsaartaan sida dastuurkaba waafaqsan.
4. Masuuliyiinta midowgu waa adeegayaasha ardayda, xilkoodana waxay u gudan karaan oo kaliya sida uu dastuurka faraayo ama uu u bannaynaayo.

## QEYBTA 2AAD: XUQUUQAHA IYO SINNAANTA

### Qodobka 1aad: Sinnaanta Ardayda

**1.** Dhammaan ardaydu waa u siman yahay dastuurka midowga, shuruucda kulliyada, iyo xeerarka guud ee jaamacada.
**2.** Arday laguma takoori karo da', midab, department, semester, dhalasho, hanti iyo fikradda uu aaminsan yahay.
**3.** Midowga waxaa waajib ka saaran inay ardayda oogu shaqeeyaan cadaalad, sinnaan, isku duubni iyo maamul-wanaag.

### Qodobka 2aad: Xaqa Midowga

1. Masuul kasta oo katirsan midowga waxaa waajib ka saaran horumarinta howl-qabadyada midowga iyo fulinta qorshayaasha hogaanka midowga iyada oo lagu saleenaayo dastuurka midowga, shuruucda kulliyada iyo xeerarka guud ee jaamacada.
2. Dhamaan ardayda kulliyada waxaa waajib ka saaran inay la wada shaqeeyaan midowga ayna u fududeeyaan howlaha midowga xili kasta oo loo baahdo.
3. Arday walba oo kulliyada dhigta waxaa waajib ka saaraan inuu u hogaansamo maamulka midowga ayna ku garab istaagaan shaqooyinka uu midowga ardayda u haayo iyadoo aan laga tilaabaynin dastuurka midowga, shuruucda kulliyada iyo xeerarka guud ee jamacada.
4. Midowga FOCSA waa isku xiraha ardayda kulliyada culuumta kombuyuutarka iyo kulliyada saas si lamid ah jaamacada sidaas darted waa in lagu ixtiraamaa laguna taageeraa si midowgu uu u xaliyo baahiyaha ardayda kulliyada.

5. Isha dhaqaale ee midowga waa ardayda ku mideesan midowga, waxaana waajib ka saaran dhamaan ardayda kulliyada bixinta dhaqaale kastaa oo lagu hormarinayo ama lagu qabanaayo howl-qabadyada midowga, iyada oo lala kaashanaayo maamulka kulliyada.

## Qodobka 3aad: Xaqa Ardayga


1. Arday kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu si xor ah wax u doorto ama loo doorto ama loo magacaabo xil hadii aysan jirin sharci udiidaayo amase xil uu ka haynin midowga FOCSA xiligaas.
2. Arday kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu ka qaybgalo howl-qabadyada iyo shaqooyiinka midowga sida ciyaaraha, dood cilmiyeedka, tababarada midowga, iwm.
3. Arday kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu ka qaybgalo howl-qabadyada ururada kale ee jaamacada iyadoo loo maraayo maamulka midowga.
4. Arday walba waxaa uu xaq u leeyahay inuu xil ka qabto ururada ardayda jaamacada ay ku midaysanyihiin haddaan sharci ka reebin, ama xil ka haynin midowga FOCSA.

# CUTUBKA 2AAD: QAAB-DHISMEEDKA IYO HOWLAHA MIDOWGA

## QEYBTA 1AAD: GUDOONKA MIDOWGA

### Qodobka 1aad: Hanaanka Gudoonka Midowga

1. Gudoonka Midowga waxa uu ka koobanyahay Gudoomiye, Gudoomiye ku-xigeen iyo Xoghayaha guud.
2. Dhammaan gudoonka midowga waxaa ay ku imaanayaan doorasho qof iyo cod ah.
3. Gudoonka midowga waa dajiyaasha ajendayaasha guud iyo qorshaha howl-qabadyada midowga.
4. Muddada xil haynta gudoonku waa 1 sano oo ka bilaabanayso marka xilka laguwareejiyo.




### Qodobka 2aad: Howlaha Gudoonka Midowga

1. Gudoomiyaha waa kan ugu sareeya midowga waana ilaaliyaha dastuurka iyo danaha midowga, waxaa uuna leeyahay go'aanka ugu dambeeya ee magacaabis ama xil ka qaadis iyo saxiixyada kama dambaysta ah ee midowga.
2. Gudoomiye ku-xigeenka waa xubinta labaad ee ugu sareeysa midowga waana kusimaha gudoomiyaha.
3. Xoghayaha waa xoghayaha guud ee midowga waxaana laga rabaa ilaalinta, uruurinta iyo keydinta xogta midowga. Sidoo kale waa qabanqaabiyaha iyo iskudabaridaha kulamada midowga.

## QEYBTA 2AAD: FULINTA MIDOWGA

### Qodobka 1aad: Hanaanka iyo Howlaha Fulinta midowga

1. Fulinta midowga waxa uu ka koobanyahay 9 xubnood oo wasiiro ah, oo uu sooo magacaabaayo gudoomiyaha midowga.
2. Xubnaha fulinta midowga waxaa ay kala yihiin:

I. Wasiirka Dastuurka iyo Cadaaladda
II. Wasiirka Waxbarashada
III. Wasiirka Arimaha Gudaha
IV. Wasiirka Cayaaraha iyo Isdhexgalka Ardayda
V. Wasiirka Haweenka
VI. Wasiirka Cilmibaarista iyo Hal-abuurka
VII. Wasiirka Maaliyadda
VIII. Wasiirka Warfaafinta iyo Xariirka Ardayda
IX. Wasiirka Howlaha Guud

3. Dhamaan xubnaha fulinta waxaa ay qabanayaan howlaha gaarka ah ee quseeya wasaaradahooda iyo howl kasta oo uu gudoonka u igmado.
4. Dhamaan xubnaha fulinta waa fuliyayaasha qorshayaasha midowga ayagoo u madaxbannaan shaqooyinkooda.

### Qodobka 2aad: Xil-wareejinta Midowga

1. Xukuumada uu waqtigeeda dhamaaday waa in ay qabanqaabisaa xaflada xil-wareejinta 14 maalin gudahood ah.
2. Xaflada xil-wareejinta waa in lagusoo bandhigaa waxqabadka iyo hadafyada midowga. Sidoo kale waxyaabihii u qabsoomay iyo kuwii aan u qabsoomin midowga.
3. Xaflada xil-wareejinta waa in ay joogaan dhamaan xukuumadii xilkeedi uu dhamaaday iyo gudoonka cusub ee la doortay ee midowga.
4. Sidoo kale xaflada xil-wareejinta waa in ay joogaan maamulka kuliyadda ayadoo maamulka kuliyadda uu ka marqaati kici doono xaflada xil-wareejinta midowga.

## QEYBTA 3AAD: KULAMADA MIDOWGA IYO GO'AAN QAADASHADA

### Qodobka 1aad: Kulamada Midowga

1. Kulamada Midowga ayaa ah kuwa lagu dajiyo dhamaan shaqada iyo howlaha fulinta midowga.
2. Kulamada midowga waa in uu dhacaa bishii hal mar ugu yaraan.
3. Xogahayaha Guud ee midowga waa qabanqaabiyaha iyo qoraha daqiiqadaha kulamada midowga.
4. Sidoo kale xoghayaha guud ee midowga waa in uu qoraa ajendayaasha midowga uuna u gudbiyahaa dhamaan xubnaha midowga kahor kulanka.

### Qodobka 2aad: Go'aan Qaadashada

1. Go'aan walba oo uu midowga qaadanaayo waa in uu noqdaa mid ka turjumaayo baahiyaha iyo danaha midowga.
2. Go'aamada inta aan la gaarin kahore, waa in ay noqdaan kuwo laga fekeray waxa ka dhalanaayo.
3. Go'aan walba oo uu midowga qaadanaayo waa in uu ansixiyaa gudoomiyaha midowga.
4. Waa in la iskuula xisaabtamaa dhamaan masuuliyadaha iyo go'aamada la qaatay dhaqangalkooda.

# QEYBTA 4AAD: ISLA XISAABTANKA IYO GANAAXA MIDOWGA

## Qodobka 1aad: Isla Xisaabtanka Midowga

1. Maamulka jaamacada iyo maamulka kulliyada waxaa ay xaq u leeyihiin inay xili walba ay la xisaabtamaan midowga FOCSA.
2. Dhamaan ardayda kulliyada culuumta kombuyuutarka ee jamacada SIMAD waxaa ay xaq u leeyihiin inay la xisaabtamaan midowga FOCSA ayagoo qaab sax ah u maraayo oo soo ogaysiinaayo gudoomiyaha midowga.
3. Gudoonka midowga FOCSA waxaa uu xaq u leeyahay inuu la xisaabtamo dhamaan xubnaha fulinta midowga.

## Qodobka 2aad: Ganaaxa Xubnaha Midowga

1. Masuul walba oo ka tirsan midowga waxaa uu xaq u leeyahay in la ganaaxo hadii uu ku kaco fal ka hor-imaanaayo dastuurka midowga, shuruucda kulliyada iyo si guud xeerarka jaamacada.
2. Ganaaxa xubnaha fulinta midowga waxaa samayni karo kaliye gudoomiyaha midowga.
3. Ganaaxa xubnaha gudoonka midowga waxaa samayni karo kaliye maamulka kulliyada.

## Qodobka 3aad: Luminta Xubinimada Midowga

1. In uu geeriyoodo xubinka.
2. In uu jaamacada mise kulliyada ka badasho xubinka.
3. In uu xilka iska casilo xubinka.
4. In uu jabiyo shuruucda midowga amase si guud nidaamka jamacada xubinka.

# QEYBTA 5AAD: MAAREYNTA MAALIYADDA MIDOWGA

## Qodobka 1aad: Maareynta Maaliyadda

1. Maaliyadda midowga waa fudeediyaha iyo dardargaliyahaga dhamaan shaqooyinka midowga.
2. Maaliyadda midowga looma isticmali karo wax ka baxsan danaha iyo shaqoyinka midowga.
3. Wasiirka Maaliyada ayaa ah qaabilsanaha maaliyada midowga asagoo report-ka ay maaliyadda ku baxayso u gudbinaayo gudoomiyaha midowga.
4. Gudoomiyaha midowga ayaa report dhamaystiran u gudbinaayo maamulka kuliyadda asagoo faahfaahin dhamaystiran ka bixinaayo sidii loo kharash gareeyay dhamaan maaliyadda midowga.
5. Ugu danbayn, maamulka kuliyadda ayaa ansixinaayo maaliyada midowga.

# CUTUBKA 3AAD : DOORASHOOYINKA

## QEYBTA 1AAD: HANAANKA IYO GUDDIGA DOORASHOOYIINKA

### Qodobka 1aad: Guddiga Doorashooyinka

1. Guddiga doorashooyinka waa guddi madaxbaan oo ku imaanaayo xulid iyo magacabid ay iska kaashanayaan maamulka kulliyadda iyo gudoomiyaha midowga.
2. Guddiga doorashooyinka waa hagaha howlaha doorashooyinka kulliyada waana cidda looga fadhiyo u cadaalad falida musharaxiinta iyo codbixiyaasha.
3. Guddiga ayaa goaaminaayo waqtiga bilaabashada ololaha doorashooyinka iyo xaqiijinta xubnaha masharixiinta.
4. Gudoomiyaha guddiga doorashooyinka ayaa ah masuulka ku dhawaaqaayo natiijada doorashooyinka.
5. Shaqada guddiga waxaa ay ka bilaabanaysaa marka la magacaabo guddiga ilaa lagaga dhawaaqaayo natiijooyinka dhamaan doorashooyinka.

### Qodobka 2aad: Doorashada Gudoonka Midowga

1. Doorashada guddoonka midowga waxaa ay qabsoontaa sannadkiiba 1 mar iyada oo la wada dooranaayo gudoomiye, gudoomiye ku-xigeen iyo xoghaye guud doorasho qof iyo cod ah.
2. Gudoomiyaha hore waa inuu diyaariyaa xafladda xilwareejinta muddo ku siman 14 bari.
3. Gudoomiyaha cusub waa inuu kusoo dhisaa xukuumad cusub muddo kusiman 31 beri oo kabilaabaneysa marka la doorto.

## QEYBTA 2AAD: SHURUUDAHA GUDOONKA MIDOWGA IYO CODBIXIYAHA

### Qodobka 1aad: Shuruudaha Musharaxa

**Gudoomiyaha:** Shuruudaha looga bahanyhay qofka gudoomiyaha u tartimaayo waa:-

1. Da'diisu waa inuusan ka yareyn 21 sano.
2. Total CGPA giisu waa inuu ahaada **B** ama kawyn.
3. Waxa laga rabaa lacag dhan 55$
4. Sidoo kle waxaa laga rabaa 50 ID CARD.

**Gudoomiye Ku xigeenka :** Shuruudaha looga bahanyhay qofka gudoomiye ku xigeenka u tartimaayo waa :-

1. Da'diisu waa inuu ahata 20 sano ama ka weyn
2. Total CGPA giisu waa inuu ahaada **B** ama kawyn
3. Waxa laga rabaa lacag dhan 35$
4. Sidoo kle waxaa laga rabaa 30 ID CARD.

**Xoghayaha:** shuruudaha looga bahanyhay qofka Xoghayaha u tartimaayo waa:-

1. Da'diisu waa inuu ahata 20 sano ama ka weyn
2. Total CGPA giisu waa inuu ahaada **B** ama kawyn
3. Waxa laga rabaa lacag dhan 35$
4. Sidoo kle waxaa laga rabaa 30 ID CARD.

**Senator:** shuruudaha looga bahanyhay qofka Senator ka u tartimaayo waa:-

1. Da'diisu waa inuu ahata 21 sano ama ka weyn
2. Total CGPA giisu waa inuu ahaada **B** ama kawyn
3. Waxa laga rabaa lacag dhan 20$
4. Sidoo kle waxaa laga rabaa 20 ID CARD.

## Qodobka 2aad: Shuruudaha Codbixiyaha

1. Inuu yahay arday dhigta kulliyada Culuumta Kombuyuutarka ee jamacada SIMAD kana sareeyo semester-ka 2aad.
2. Inuu haysto ID-ga jaamacada.
3. Inuu imaado goobta codbixinta.
4. Codbixiyaha waxaa uu codayni karaa kaliye 1 mar.

# CUTUBKA 4AAD : DASTUURKA

## QEYBTA 1AAD: FURITAANKA IYO WAX KA BADALKA DASTUUKA

### Qodobka 1aad: Furitaanka Dastuurka

1. Maamulka Midowga ayaa leh soo jeedinta iyo ogolaanshaha dib u furitaanka dastuurka.
2. Maamulka Kuliyadda waxaa uu awood u leeyahay inuu furo dastuurka xiligii wax kabadal ay u baahdaan.
3. Ciddii furto ama wax ka badal ku samayso dastuurka iyadoo ogolaansho ka haysan gudoonka midowga lama aqoonsan doono.
4. Waa inuu jiraa guddi u xilsaaran wax ka badalka dastuurka.

### Qodobka 2aad: Wax Ka Badalka Dastuurka

1. Midowga waa inuu magacaabo guddi ku-meel gaar ah oo u xilsaaran waxkabadalka dastuurka.
2. Sababaha iyo qodobada wax ka badalka dastuurka waa in ay cadyihiin aynan u adeegaynin dano gaar ah mise ujeedooyin gooni ah.
3. Qodobada wax ka badalka dastuurka waa in yihiin kuwa u adeegaayo danaha ardayda kulliyada, midda kulliyada iyo si guud jaamacadda.
4. Gudoonka midowga iyo wasiirka dastuurka waa inay korjoogteeyaan oo u fududeeyaan guddiga arimaha wax ka badalka dastuurka.
5. Ardayda kulliyada iyo maamulka kulliyada waa in laga talo waydiiyaa qodobada wax ka badalka dastuurka.

## QEYBTA 2AAD: ANSIXINTA DASTUUKA

### Qodobka 1aad: Ansixinta Dastuurka

1. Si loo ansixiyo qodobada wax ka badalka dastuurka waa in yihiin kuwa u adeegaayo danaha ardayda kulliyada, midda kulliyada iyo si guud jaamacadda.
2. Qodadaba wax ka badalka waa in inta badan ardayda kulliyada ay wadar ogolyihiin ayna saxiixaan.
3. Guddiga dastuurka iyo midowga waa in si aqlabiyad leh ay kuwada saxiixaan ogolaanshaha qodobada wax laga badalay.
4. Maamulka kulliyada waa inay ogoladaan qodobada wax laga badalay.
5. Hormuudka kulliyada ayaa leh ogolaanshiyaha oogu danbeeyo ee qodobada wax ka badalka.

## GUNAANAD

Halkaan waxaa ku dhamaaday nuxurka Dastuurka Midowga Ardayda Culuumta Kombuyuutarka ee Jaamacada SIMAD (FOCSA). Dastuurkaani waxaa ku qoran shuruucda iyo nidaamka shaqo ee midowga FOCSA.

Dastuurka waxaa lagu daqabi doonaa dhamaan shaqooyinka iyo howlaha midowga. Dastuurkaani waxaa uu dhaqangal noqonayaa markii uu saxiixo hormuudka kulliyada.

## MAHADCELIN

Ugu horeyn, waxaa ay mahad oo dhan u sugnaatay Eebbe oo noo suurtagaliyay inan dajino oo qorno Dastuurka Midowga Ardayda Culuumta Kombuyuutarka ee Jaamacada SIMAD (FOCSA).

Ugu danbayn, waxay mahad u sugnaatay dhamaan guddiga, ardayda, maamulka kulliyada iyo cid walba oo qayb ka qaadatay dajinta iyo qoritaanka dastuurka. MAHADSANIDIIN!

Saxiix: ___________________________

Gudoomiyaha Midowga FOCSA

Saxiix: ___________________________

Gudoomiyaha Guddiga Dastuurka

Saxiixa Kuliyadda: ________________________